



Royal Commission-ka (Guddiga) Nadaamka Caafimaadka Dhimirka ee Fiktooriya

Ujeedada Guddiga loo yaqaan Royal Commission-ku waa in la bixiyo waxqabad dhowr ah oo muuqda kuwaas oo bedeli doona nadaamka caafimaadka dhimirka Fiktooriya una suurgelin doona reer Fiktooriya inay hellaan caafimaadka dhimirka ee ugu fiican.

Si loo horamariyo natiijooyinkayaga iyo talooyinka waxaanu hawlgelinaynaa bulshada reer Fiktooriya waxaanuna ku weydiisanaynaa inaad nala wadaagto khibradaada, iyo aragtida iyo fikradaha caawimaya wanaajinta nadaamka caafimaadka dhimirka.

Waxaanu leenahay warsidaha (portal) online ah oo kuu ogolaanaya inaad nala wadaagto taladaada adoo soo gudbinaya iyada oo qoraal, muuqaala, maqaala ah ama fiidiyow ah. Foomkaan waxaa lagu helli karaa dhowr luqadood.

Guddigu (Commission) wuxuu diirada saarayaa carab-baabida iyo nadaamka xalinta arrimaha guud halkii uu baari lahaa kaysas shakhsiyeed ama dhacdooyin.

Waxaad awoodaa inaad aragti ku darsato adigoo:

- Wacaya **1800 00 11 34** ama **03 7005 3010** haddii aad u baahan tahay adeega turjumaanka (waxaa la hella 9 subaxii ilaa 5galabtii Isniinta ilaa Jimcaha, marka laga saaro maalmaha fasaxa)
- Waxaad u dirtaa: PO Box 12079, A'Beckett St, Victoria 8006 (waanu tarjumi doona warqadaada)
- Adigoo ku gudbinaya qoraalka online: <https://rcvmhs.vic.gov.au/submissions>
- Email ku dirida: contact@rcvmhs.vic.gov.au

Haddii aad qabto walaac hada ah oo ku saabsan bixiyaha adeega caafimaadka dhimirka

Royal Commission-ku ma awoodaan inay xaliyaan dacwada shakhsiyeed ama khilaafaadka. Haddii aad welwel ka qabto la macaamilkaaga adeega caafimaadka dhimirka dadweynaha reer Fiktooriya, ama toos ayaad ula xiriiri kartaa ama waxaad la hadli kartaa Guddiga Dacwooyinka Caafimaadka Dhimirka (MHCC).

MHCC waa madax banaan tahay, waana hay'ad takhsus ah, taas oo ilaalisa xuquuqda xalisana dacwooyinka ku saabsan adeegyada caafimaadka dhimirka dadweynaha. Waxaad la xiriiri kartaa MHCC tel: 1800 246 054 ama email help@mhcc.vic.gov.au. Waxaad kaloo booqan kartaa www.mhcc.vic.gov.au macluumaad intaas ka badan.

Haddii aad welwel ka qabto dhakhtar guud oo diiwaangashan

Haddii welwelkaagu ku saabsan yahay waxqabadka ama dabeecada dhakhtarka guud ee diiwaangashan (sida dhakhtarka dhimirka ee diiwaangashan, dhakhtarka cilmi nafsiga, dhakhtarka guud iwm) waxaad la xiriiri kartaa Hay'ada Xeerinta ee Dhakhaatiirta Caafimaadka (AHPRA). Waxaa la xiriiri kartaa AHPRA adiga oo wacaya 1300 419 495 ama waxaad booqan kartaa: www.ahpra.gov.au.



Haddii aad welwel ka qabto adeegyo kale oo caafimaad

Guddiga Dacwadaha Caafimaadku (HCC) waa hay'ad madax banaan oo aan dhinacna raacsanayn oo dacwadaha ku saabsan adeegyada macluumaadka iyo arrimaha macluumaadka caafimaadka Fiktooriya. HCC waxay qaban kartaa dacwooyinka ku saabsan adeegyada caafimaadka dhimirka iyo adeegbixiyayaasha. Waxaad la xiriiri kartaa HCC adigoo wacaya 1300 582 113 ama booqanaya: www.hcc.vic.gov.au.